



TAARIKHAHA CUSUB EE INTIXAAMIDA IYO MEELAYNTA DUGSIYADA K2

Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Boston ayaa qoysaska ardayda dugsiyada barbaarinta (K2) ogeysiin doona meelaynta dugsiyada iyagoo isticmaalaya iimayl 10-ka Abriil iyo boostada 17-ka Abriil - halkii ay ka noqon lahayd taariikhdiisii hore loogu dhawaaqay ee 20-ka Maarso. Dib udhacani wuxuu BPS u ogalaanayaa inay bisha Maarso intiximaan koboca luqada ee ardayda geli doonta K2, tan oo u ogalanaaysa ardayda inay helaan wakhti dheeraad ah oo ay wax ku bartaan si ay u horumariyaan xirfadahooda Luqada Ingiriisida. Isbadelkan lagu sameeyay intixaaamida bisha Maarso ayaa sidoo kale waxa u baahan sharciyada cusub ee gobolka iyo federaalka. Taariikhaha ogeysiiska ee fasalada kale isma badeli doonaan.

Inkasta oo aan ogsoonahay muhiimada ay leedahay ogeysiiska meelaynta dugsiyada oo aan dib dhicin, haddana waa inaan taas ku dheelitirnaa baahida loo qabo inaan xaqiijino in dhamaan ardaydu ay helaan doorashooyinka meelaynta dugsiyada barbaarinta oo aad u saxsan.